



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Telephone: 0612008723. E-mail: info@sonsaplatform.org website: www.sonsaplatform.org

BAAQ

13 November 2019: Dallada Bulshadda Rayidka ee SONSA oo horay loo oran jiray SOSSENSA kuna mideysanyihiin Ururada Bulshada Rayidka, Ganacsatada iyo Xirfadleyda, waxa ay aad uga walaacsantahay khilaafka siyaasad ee kajira Dalka, kaas oo u muuqdo mid sii xoogeysanaayo, caqabadna ku ah geedi socodka dowladnimada iyo deganaashaha dalka.

Dalladu waxa ay ka xuntahay qaabka siyaasiyiinta Soomaaliyeed u wajahayaan kala aragti duwanaanshaha u dhaxeeya iyaga oo aan u turaynin bulshada soomaaliyeed oo la daalaa dhacaysa duruufo nololeed oo adag. Sida muuqata siyaasiyiinta mucaaradka iyo mas'uuliyiinta dowlada waxa ay u muuqdaan kuwo is fiirsanaya kuna dhaqaaqaya talaabooyin la isku ficlayo, kuwaas oo aan dalka wax xal ah u hayn .

Waxaa muuqata in habka ay mas'uuliyiinta u maareenayaan qilaaka siyaasadeed ee u dhaxeeya uu sii hurinaayo khilaafadka u dhaxeeya mana laga aamusi karo. Sidaas darteed dallada waxa ay ku baaqeysa mas'uuliyiinta in la ixtiraamo xuriyada dhaqdhaqaaqa dadka lana ilaaliyo sharciga dadlka u degsan, mushkiladaha taaganna lagu dhameeyo wada hadal si laysaga kaashado xalinta dhibaatooyinka dalka ka jira.

Iyada oo la eegayo khilaafaadka isbiirsanaya ee u dhaxeeya Dowlada Federaalka iyo Mucaaradka , Dallada SONSA waxa ay qaadaysaa talaabo kasta oo uga aadan sidii Dalka looga badbaadin lahaa dhibaatooyin siyaasadeed oo dib u dhac ku keena. Dallada waxa ay magacaabi doontaa guddi ururada bulshada rayidka ah oo qayb ka qaata xalinta xasaradaha siyaasadeed ee socda sidii loo damin lahaa, gogol xaarna ugu noqon lahaa in wadahal dhexmaro dowlada iyo mucaaradka. Guddiga ururada bulshada rayidka waxa ay shirar ay ugu kala dab qaadayaan la yeelan doonaan mas'uuliyiinta dowladda federalka, golaha shacabka, xisbiyadda mucaaradka, maamul gobaleedyada iyo beesha caalamka.

Dalladu waxa ay ugu baaqaysaa dhammaan siyaasiyiinta mucaraadka, mas'uuliyiinta Dowlada iyo shacabka Soomaliyeed in ay la shaqeeyaan guddiga ururada bulshada rayidka si mas'uuliyada dalka ka saaran u guto.

Wabilaahi Towfiq

